



Herbes

Herbes waxa sababo fiirus oo dhowr nooc kala eh. Mid wuxu sababi ka soo bax, maqaarka oo ku dilaaco iyo bushimaha ama afka oo nabro yeelanaayo. Mid kale maqaarka buu dilaacin, nabro iyo wuxu ka soo bixi xubnaha galmada. Herbeska afka candhuufta buu ku faafaa iyo shuminta. Herbeska oo hoose ku dhaco (oo loo yaqaan herbeska galmada ama genital herpes) wuxu ku faafi dhacanka xubnaha galmada, waa haddii infekshanka herbes markaas u haayo, oo suubisid galmada siilka oo difaac leheen. Herbes waa la isku daartaa galmada futada iyo afka oo difaaca leheen.

Astaamaha herbes

Herbes waxaa koow lagu gartaa ranjiga maqaarka oo isbada-laayo, iyo marmar cuncun oo qaas ahaan meelaha fiiruska ku jiro. Markaas kadib bey meelahaas biyo galaayaan iyo intey dilaacaan bey nabar noqonaayaan. Nabrahaas waxey ahaan karan xannuun miiran, qaas ahaan markaa taabato. Xubnaha galmada gudahiisa wuu ku barari iyo ranjiga isbadali. Adiga waxa xitaa waqti koowad oo infekshanka isku aragtid qando, madax xannuun iyo qanjirada oo ku bararo oo ku dhanqado. Adiga waxa xitaa kugu adkaan karo inaa kaadisid.

Adiga qasab ma ahan inaa isku aragtid astaamaha marka koowad infekshanka kug dhaco. Dadka uu ku dhaco herbes badanaa ma isku arkaan astaamo. Haddii aad isku aragto astaamo waxey qaadan ilaa hal ilaa saddax isbuuc laga soo xisaabiyo maalintii lagugu daartay infekshanka, oo markaas baa dhib kala kulmi.

Fiiruska herbes badnaa jirka buu iskaga jira, oo infekshanka markale buu kugu kici kara, laakin si qafiif ah iyo muddo gaaban.

Iska baar herbes

Waa la hubin kara herbes haddii dhacaan laga qaado ka soo baxa iyo meelaha nabarka. Fiiruska waxa la xaqiijinkara haddii dhacaan laga qaado meesha nabarka. Baaritaanka ma ahan bilash.

Daaweyn

Herbes lama daaweynkaro. Cudurka markuu kugu kaco saameytiisa baa la yarenkara oo la gaabinkara, daawooyinka qarkood oo kuwa fiiruska herbes. Daaweynta ma ahan bilash iyo cudurka kama mid ahan cudurada ku jiro cudurada difaacida cudurada.

Waa muhiim inaa ku fakirtaa markey noqoto herbes

Waxa caadiyan badan herbeska afka oo fiiruska herbeska ku dhaco xubnaha galmada sidaa ma u badna. Laakin herbeska afka waa caadiyan in laga heli xubnaha galmada.

Herbeska xubnaha galmada waxbo ma saameynaayo ilmo dhallitaanka, laakin waa xannuun miiran markuu kugu kacsanyahay. Aad bey u wanaagsan tahay inaa u sheegto qofka aad la nooshahay inaa qabto infekshanka herbes haddii uusan markaas kugu kacsaneen. Astaamaha waa soo yaraanaayaan muddo kadib, oo infekshanka oo kugu kacsan baa astaamo isku arkeen. Bacda guska waa difaac fiican markey noqoto herbes, waa haddii infekshanka markaas kugu kacsanyahay ama haddii kale.

Halista in markaa fuulanaysid cunuga herbes ku dhaco ma badna. Haddii adiga oo hooyada noqonaayo markaas herbes kugu kacsanyahay waxa jiro waxyaabo la suubinkaro marka lagu fuulinaayo, si oo cunuga looga difaaco infekshanka.

